

YAA SOO CODSAN KARA

- NGO-yada Degaanka – **toos** ayaa ay u soo codsanayaan iyaga oo soo gudbinaya caddeynta in ay iska diiwaangeliyeen maamulka ama ay raalli ka yihiin odayaasha iyo bulshada degaanka. NGO-yada degaanka waxaa la door bidayaa in ay leeyihiin xisaab banki oo caalami ah.
- NGO-yada degaanka ee **la-hawlgala** hay'adaha Qaramada Midoobey ama NGO-yada Caalamiga ah
- NGO-yada Caalamiga ah
- Hay'adaha Qaramada Midoobey
- Dhaqdhaqaaqa Laanqeynta Cas

SHURUUDAHA MAALGELINTA MASHRUUCA WAA

- Degdeg wax uga qabanaya (wax ka qabashada baahiyo degdeg ah oo ay ku jirto badbaadinta naf) xaalad bani'aadamnimo oo degdeg ah
- Buuxinaya kaalin bannaan oo la aqoonsan yahay (waax ahaan ama degaan ahaan) marka ay socdaan hawlaha wax ka qabashada xaaladda degdegga
- Wax ka qabanaya masiibooyin dabiici ah – daadad/fatahaado iyo abaaro
- Taageeraya nolol-raadsiga iyo hababka la qabsiga wanaagsan ee kuwa ay saameysay xaaladda degdegga ah
- Haddii haraaga lacagta HRF ay ka yar tahay \$5 milyan, keliya waxqabad naf-badbaadin ayaa la maalgelin karaa; arrimaha kale waa in si gaar ah qiil loogu sameeyaa
- Waa in aannu soconeyn wax ka badan lix bilood
- Uu waafaqsan yahay yoolalka/ujeedooyinka istiraatiijiyadeed (muddada fog) ee Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira (CAP) iyo mudnaanaha waaxdaas
- Dhammeystiraya waxqabadyada hay'adaha kale ee degaankaa la beegsaday laakiin ka fogaanaya ku laba noqosho iyo anna waa i kan.
- Waxqabadkiisu aan ku wajahneyn dhibaatooyinka bulsho ee dabadheeraaday iyo baahiyaha horumarineed ee muddada fog.

XAKAMEYNTA MAALIYAD-SIINTA

- Hay'adda soo codsaneysa waa in aaney markiiba wadin wax ka badan saddex mashruuc oo ay maalgelisey HRF
- Ugu badnaan **USD 250,000** (Xaaladaha laga fursan waayo ilaa \$500,000)
- Lacagta toos mashruuca loo gelinayo – **ugu yaraan 80%**
- Kharashka ku baxaya maamulka/hawlgalka (kirada xafiiska, agabka xafiiska, isgaarsiinta iwm) – **ugu badnaan 7%**.
- Lacagta loogu talagalay ku-soo-booddada (*contingency*) – **ugu badnaan 5%** (waxaa la isticmaali karaa oo keliya ka dib marka oggolaansho qoraal ah la helo)

- Laguma maalgelin karo hantida waaweyn (baabuurta, qalabka isgaarsiinta, qalabka iyo agabka xafiiska).
- Laguma bixin karo cashuurta kastamka iyo tan soo dejinta
- Maalgelinta shaqaalaha – keliya kuwa fulinaya mashruuca.

DHEERI

Dalabka maalgelinta mashaariicda waa in loo isticmaalaa habraaca cusub ee HRF kaasoo laga heli karo bogga internetka ah <http://ochaonline.un.org/somalia>